

Qaan-celintu waaa lacagta uu garsooruhu amro in eedaysanuhu uu siiyo dhibbanaha si looga magdhabo khasaarihii ka soo gaaray dembiga. Qaan-celintu waa qayb ka mid aha xukunka dacwadda eedaysanaha ama tallaabo lagu qaadi karo kiisaska qaangaarka iyo dhallinyarada labadaba kaddib markii eedaysanaha dembiga lagu helo ama uu qirto. Tirada qaan-celinta uu garsooruhu amro waxay ku xirantahay kolba inta uu la egyahay kharaska dhibbanaha ka soo gaaray dembiga iyo awoodda uu dambiiluhu uu leeyahay in uu wax bixiyo.

Yaa codsan kara qaan-celinta?

Dhibbanayaasha ayaa codsan kara qaan-celinta marka laga reebo wixii ay jeebkooda ka bixiyeen ee ka dhashay dembiga. Ururrada sida kaniisadaha, dugsiyada, ganacsatada iyo hayadaha dawladda ayaa sidoo kale u qalmi kara haddii ay wax ka qaban karaan qasaaraha dembigu uu keenay.

Qaan-celintu maxay dabooli kartaa?

Qaan-celinta waxaa codsan karaa dhibbanayaasha marka laga reebo wixii ay jeebkooda ka bixiyeen oo si toosa uga dhashay dembiga. Kharshka u qalmidda waa lagu dari karaa, laakiin laguma koobi karo biilasha daaweynta iyo ilkaha, kharshka la talinta, mushaaroyinkii baaqday, khasaaraha hantida, iyo magdhowga khasaaraha hantiyeed.

Haddii lacagta jeebka laga bixiyay aan la ogayn cadadkeeda oo idil waqtiga xukunka dhacayo ama amarka dhallinyarka looga arrinsanayo, cadadka qaan-celinta waxa la go'aamin doonaa waqti dambe, inkastoo qaan-celinta weli. la soo codsan karo. Waxa kaloo la samayn karaa codsiyada kharashyadii horay loo galay, sida kharshyada daaweynta iyo la talinta hadda socota.

Waa maxay kharshyada aan la daboolayn?

Kharshyada aan la xariirin dembiyada uu galay dembiilaha laguma darayo amarka qaan-celinta. Maxkamadda dembiyada ma amri karto qaan-celinta lacag-bixinta ku saabsan xanuunka jirka, dhiibaatooyinka, ama qiirada qarracnka. Dhibbanayaasha doonaya magdhowga lacageed khasaaraha noocaasa waxay ay qabsan karaan qareen si ay u dabagalaan dhaawaca gaarka iyago dembiilaha ku furaya dacwad madaniya. Waa in xisaabta lagu daro ilaha maaliyadeed ee dembiilaha iyo kartida uu leeyahay bixinta marka ay habboontahay fursaddan.

Sidee loo codsanyaa qaan-celinta?

Codsiyada qaan-celinta waa in ay noqdaan kuwa qoraala iyadoo la isticmaalayo *Qoraal Dhaara ee Qaan-celin* ka hor dhagaysiga xukunka ama nidaamka dhallinta looga arrinsanayo. Foommkan waxa laga heli karaa xaafiisyada xeerilaalinta, asluubta, ama siidaynta shuruudaha, kaaliyaha maxkamadda. Si aad u ogaato meesha foomamka loo soo diraya, la xariir u doodaha dhibbanaha ama ama xeer-ilaaliyaha kiiska gacanta ku haya.

Codsiyada qaan-celinta waa in lagu soo kabaa dhammaan nuquullada faah-faahinaya ee kharashyada dhibbanaha, oo ay ku jiraan biilasha daaweynta/ biilasha ilkaha, rasiidyada wada-bixinta shirkadaha caymiska, qiimaynada baddalidda shayada la xaday ama magdhowga qasaaraha hantida gaarka, biilasha la talinta, kharashyada gaadiidka, caddaynta mushaaroyinka baaqday, iyo kharashyada kale ee sida tooska dembiga ula xariira.

Dhibbanayaasha wa inay u soo gudbiyaan goor hore macluumaadkooda qaan-celinta inta ay socdaan hawlaha eedda hadba wixii suurtagal ah. Dacwadaha dembiyada intooda badan waxa lagu dhammeeyaa heshiis la isla gaaro, waana muhiim in xeer-ilaaliyuhu in uu haysto macluumaadka qaan-celinta inta lagula eedaysanaha jiro hawlaha gorgortanka. Haddii dhibbanuhu uu goor daambe mujiyo ama keeno kharashyo dheeraada, macluumaadka ku saabsan kharashyadaas waa in lagu soo hagaajiyaa xeerilaalinta.

Sidee loo go'aaminayaa qaan-celinta?

Marka xukunku dhacayo ama nidaamka dhageysiga dhallinka laga arrinsanayo, maxkamadda isla markiiba waxay amraysaa in qaan-celinta ay tahay qayb ka mid ah dacawadda xukunka ama nidaamka. Kiisaska qaarkood oo aan weli la sugin caddadka qaan-celinta xilliga dhageysiga dacwadda, maxkamadda waxay dib u dhigi kartaa arrinta iyo g'aamin karta caddadka dhabta ah ee qaan-celinta waqti dambe. Awooddaha dacwad qaadista qaarkood, siidaynta shuruudda leh ama xarumaha asluubta waxay ka caawiyaaan maxkamadda go'aaminta caddadka qaan-celinta.

Maxkamaddu waa diidi kartaa ama yareyn kartaa qaan-celinta, laakiin waa in ay diiwaangelisaa sababaha go'aanka. Maxkamaddu marka ay gaareyso go'aankeeda qaan-celinta waxa ay ka fiirsanaysaa: (1) inta uu la egyahay qasaaraha maaliyadeed ee dembiga ka dhashay ee uu soo sheegtay dhibbanuhu, (2) dakhliga, ilaha, iyo waajibaadka dembiilaha.

Marxaladda uu eedaysanaha kaga doodayo caddadka qaan-celinta dhexdeeda ama shayo cayiman ee lagu dalbaday qaan-celintooda, dhagaysiga waa la muddayn karaa. Xeer ilaaliyaha ayaa u xilsaaran caddaynta inta

uu la egyahay khasaaraha soo gaaray dhibbanaha. Maxkamadda waxbay ka baddali kartaa ama waxay soo saari kartaa amarka qaan-celinta xukunka ka bacdi ama nidaamka. Haddii (1) eedaysanuhu dacwaddiisu ay maxkamadda hortaal, (2) dhibbanuhu uu soo gudbiyay caddayn buuxda ee ku saabsan xuquuqda qaan-celinta, (3) dhab ahaan inta uu gaarsiiyanahay khasaaraha soo gaaray dhibbanaha oo aan la ogayn marka xukunku dhacayay ama nidaamka, dhagaysiga qaan-celinta. Ficliyan, si kastaba, waxay tahay wax dhib badan in la baddalo amarka xukunka ka bacdi, iyadoo dhibbanayaasha lagu dhiirri gelinayo inay muujiyaan qasaaraha soo gaaray isla markaana ay qoralladooda keenaan xukunka ka bacdi.

Kaddib marka Qaan-celinta la Amro

Dhab ahaan, dembiilaha waxa lagu amri doonaa in uu bixiyo qaan-celinta sida ku cad jadwalka lacag-bixinta. Sarkaalka siidaynta shuruudda ayaa ka masuula samaynta jadwalka lacag-bixinta iyo ilaalinta lacagaha la siiyay dhibbanayaasha. Haddii eedysahaha aan la gelin siidaynta shuruudaha, kaaliyaha maxkamadda ama sarkaale kale ayaa samayn kara jadwalka lacag-bixinnada. Haddii aan la amrin qorsho lacag-bixin, markaas ka bacdi qaan-celinta waxa la sameynayaa marka xukunka dhacayo. Degmooyinka qaarkood, qaan-celinta waxa loo diri karaa hayadaha lacag uruurinta.

Qaan-celin kasta oo maxkamaddu amrto waxa loo dhiibi doonaa kaaliyaha maxkamadda. Kaaliyaha maxkamadda wuxu lacagta hayn karaa muddo 30 cisho, dabadeedna boostada ayuu ugu diri doonaa iyado jeeg ah dhibbanaha. Haddii dhibbanayaashu aanay helin jadwalka lacag-bixinta, waa in ay la xariiraan sarkaalka siidaynta shuruudaha ee dambiilaha ama kaaliyaha maxkamadda.

Haddii dambiiluhu uu xabsiga ku jiro, dhibbanayaashu waa inay la xariiraan kaaliyaha maxkamadda ama Barnaamijka Gargaarka Dhibbanaha ee Waaxda Asluubta (800-657-3830) si loo hubiyo in amarka qaan-celinta loo diray rugta asluubta. Rugaha asluubta gobolka waxay u dirayaan lacagta qaan-celinta dhibbanayaasha sida jadwallada ku cad. Qaybinta lacagaha qaarkood waa bilkasta ama rubacle, iyadoo qaan-celinta qaarkoodna lagu salayn doono sanadle.

SU'AALAHAY WADAAGAAN WAXA KU SAABSAN QAAN-CELINTA

Sidee caymisku uu saamayn ugu yeeshaa codsiyada qaan-celinta dhibbanaha? Si loogu qalmo qaan-celinta, dhibbanayaashu uma gudbin karaan dacawad shirkadaha caymiskooda khasaaraha soo gaaray. Si kastaba, sababtoo ah iyadoo aanay jir wax dammaanad qaada oo ah in eedaysanuhu uu bixin doono qaan-celinta lagu amaray, dhibbanayaasha waxaa lagu dhiirri gelinayaa in ay dacwaddaooda u diraan caymiskooda. Maxkamaddu waxay amri kartaa eedaysanaha in uu siiyo dhibbanayaasha lacagta wadabixinta iyo kuwa soo goynta.

Dhibbanayasha xareystay dacwad madani ah malaga reebi karaa in ay qaataan qaan-celin? Xareynta ama qorshaynta xareynta dacwad madani ah maxkamadda loogama adegsan karo wax sal ahaan lagu dafirayo qaan-celinta.

Ma lagu helayaa dulsaar daynta qaan-celinta? Dulsaar laguma helayo amarka qaan-celinta dacwadaha madaniga. Haddii amarka qaan-celinta uu dhaqangalo xukun ahaan, markaas ka bacdi dulsaarka faraaqaa aan la bixin ee xukunka madaniga waxaa xisaabinayaa kaaliyaha maxkamadda isago ku daraya faraaqaa illa inta laga bixinayo. Dulsaarka laguma xisaabinayo amarka qaan-celinta ee dacwadda ciqaabta.

Waa maxay macnaha "amarka dib u dhigista qaan-celinta xukun madani ahaan"? Kaaliyaha maxkamadda wuxu meel marin karaa amarka qaan-celinta ee kiiska ciqaabta xukun dacwad madani ahaan. Xukunkan waa amar maxkamadeed oo lagu sheegayo in dhibbanuhu u dembiilaha uu lacag ku leeyahay. Inkastoo tallaabadan ay tahay ujro la'aan, haddana dhibbanayaashu waa in ay soo buuxiyaan foomam dheeraada iyago u baahan kara in la qaado tallaabooyin dheeraada maxkamadda madaniga dhexdeeda si waxa la xukumay loo soo uruuriyo. Wixii macluumaad dheeraada, eeg qoraalka sharraxaadda Uruurinta Qaan-celinta Maxkamaddu Amartay (Collecting Court-Ordered Restitution) waxaa laga heli karo Xaafiiska Barnaamijyada Cadaaladda (Office of Justice Programs) Shahabakadda internetka dps.mn.gov/divisions/ojp.

Maxaa dhacaya haddii edaysanuhu aanu bixin qaan-celinta? Dhab ahaan marka la amro bixinta qaan-celinta taasuu macnaheedu ma aha in dhibbanaha lacag la siin doono. Lacagb-bixinta qaan-celinta ay maxkamaddu amartay waxay ku xirnaan doontaa dhowr arrimood, oo ay ku jiraan ilaha eedaysanaha, hannaanka uruurinta laga adeegsado degmooyin gaara, iyo dadaallada sarkaalka siidaynta shuruudda. Wixii macluumaad dheeraada, eeg qoraalka sharraxaadda Uruurinta Qaan-celinta Maxkamaddu Amartay oo laga heli karo Xaafiiska Barnaamijyada Cadaaladda Shahabakadda internetka ee dps.mn.gov/divisions/ojp.

SU'AALAHAY WADAAGAAN WAXA KU SAABSAN QAAN-CELINTA

Waa maxay faraaqaa u dhexeeya qaan-celinta iyo magdhowyada? Magdhowyada Dembiyada Dhibbanaha waa barnaamij goboleed oo siinaya kaalmo dhaqaale dhibbanayaasha dambiyada dagaalka. Magdhowyada dhibbanayaasha waxaa looga magdhabi karaa kharashyada ka soo gaaray dembiga, oo ay ku jiraan biilasha daaweynta, mushaaroyinka baaqday, kharashka duugta, khasaaraha taageerada. Si kastaba, dhibbanayaasha loogama magdhabayo qasaaraha hantida gaarka ah. Magdhowga dhibbanayaasha waxa loo magdhabayaa iyada oo aan loo eegayn in kiiska lagu qaaday ama eedaynta lagu guulaystay. Marka la barbar-dhigo, qaan-celinta waxa la amri karaa keliya marka eedaysanaha xukun ku dhaco. Dhibbanayaasha dacwadaha dagaalka waa inay codsadaan magdhowga xitaa haddii ay dalbanayaan qaan-celinta.

Dhibbanayaasha iyo qoysaskooda ma sugayaan dhammaystirka daaweynta kasta, ilkaha, ama daawynta caafimaadka dhimirka si ay u codsadaan magdhowyada. Waxa lagu dhiirrigelinayaa in ay codsadaan sida ugu dhaqsiiyaha badan ka bacdi inta aan la dedejin shilka dib-u-bixinta. Foomamka dacwaddawaxa laga heli karaa Guddiga Magdhowga Dhibanaha Dembiga Minnesota (Minnesota Crime Victim Reparations Board) telefoonka 651-201-7300 ama dps.mn.gov/divisions/ojp.

Eedaysanayaasha dhallinyarada ma laga doonayaa in ay bixiyaan qaan-celinta? Xuquuqda idil ee dhibbanayaasha dembiyada, oo ay ku jiraan xuquuqda qaan-celinta, waxaa laga codsanyaa maxkamadda dhallinyarada. Intaas waxa sii dheer, sharciga Minnesota wuxuu qabaa, in dhibbanuhu uu ku furi karo kiis madaniya waalidika dhallinka ee eedaysanaha dhaawaca gaarka ah ka soo gaaray ama khasaaraha hantida ka soo gaaray wixii ku siman 1,000 doollar.

NALAGA SOO XIRIIR

Office of Justice Programs
445 Minnesota Street, Suite 2300
St. Paul, MN 55101-1515

limayl: dps.justiceprograms@state.mn.us
Shabakadda internetka: www.ojp.state.mn.us

651-201-7300 Telefoonka Guud
888-622-8799 Telefoonka Lacagla'aanta
651-205-4827 Khadka Dadga Maqalka Culus (TTY)

651-296-5787 Fakis

6/11

RESTITUTION - SOMALI

QAAN-CELINTA



XAFIISKA BARNAAMIJKA
CADDALADDA

WAAXDA AMMAANKA GUUD EE MINNESOTA

OFFICE OF JUSTICE PROGRAMS
MINNESOTA DEPARTMENT OF PUBLIC SAFETY